

Magangelyo

Magangelyo waa meel ku taalla waddan shisheeye oo u furan qof qaxooti ah.

Qof qaxooti ah waa qof lagaga sameeyey waddankiisa dabagal. Qof magangelyodoon ah waa qof iskii isaga oo aan isa soo sheegin u yimi Norway dabadeed codsadey in la magangeliyo oo loo aqoonsado qaxootinnimo. Haddii codsiga la aqbalo waxa magangelyodoonka loogu yeedhaa qof qaxooti ah.

Haddii codsigaaga magangelyada la soo diido, waa inaad Norway ka dhoofto mana codsan kartid siyaabo kale oo ah joogitaan ama ogolaansho shaqo.

Haddii aad rabto inaad Norway u timaaddo inaad ka shaqeyso, markaa waa inaad codsato ogolaansho shaqo.

Magangelyo

Qof wuxuu xaq u leeyahey in Norway laga siiyo magangelyo haddii uu qofku la yimaado sabab cad oo ah iney jirto cabsi iyo dabagal waddankiisa ka heysata.

Sababta dabagalku waa iney ahaato mid ku saleysan isir, diin, dhalasho, in xubin laga noqdo urur bulsho oo gaar ah ama aaminsan siyaasad kale. Dabagalku waa inuu ahaado mid shakhsi ah. Cabsida dabagalku waa iney sidoo kale ahaato sababta aanuu qofku ugu noqon kareyn dalkiisa kaas oo aaney dawladdu siin kareyn ama rabin iney siiso magangelyo inaan la dabagelin.

Kuwa aan buuxin mid ama in ka badan shuruudahaas uma laha xaq in Norway laga siiyo magangelyo. Dabagalka gaar ahaan u khuseeya haweenka ama dabagalka ku saleysan qof oo loo dabagalo isaga oo run ka sheega dareenkiisa jinsinimo (lab/dhedig) waxa lagu heli karaa magangelyo. Dabagalka ey kugu sameeyaan dawladda dalkaaga iyo kuwa kaleba, sida metelan kooxo hubaysan ama qaar ka mid ah goyskaaga waxa lagu heli karaa magangelyo.

Sida caadiga ah ma heleysid magangelyo haddii aad ka heleyso magangelyo dawladda dalkaaga ama haddii aad ku magangeleyso qeyb waddankaaga ka mid ah. Dhibaatooyinka guud ee dhaqaale ee waddankaaga uma aha sidoo kale sabab aad ku hesho ogolaansho degenaansho Norway.

Ogolaansho degenaansho sababo ilaalin dartood
Haddii aad buuxin weydo shuruudaha ku xidhan in lagu helo magangelyo, waxaad heli kartaa ogolaansho degenaansho sababo ilaalin dartood haddii aaney ammaan aheyn inaad ku noqoto waddankaaga. Tusaale waxa tan u noqon kara iney jiraan xaalado deggenaansho la'aan ah oo u keeni kara naftaada khatar, ama inaad khatar u tahey in lagu silacdiilo ama si bini'aadamnimodarro ah laguula dhaqmayo.

Ogolaansho degenaansho sababo bini'aadamnimo dartood

Waxaad ku heli kartaa ogolaansho degenaansho sababo bini'aadamnimo dartood haddii ey jiraan sababo adag oo bini'aadamnimo, metelan xaalado caafimaad oo khatar ah ama iyada oo loo eegayo xaalada caruurta da'doodu yar tahey. Waxa tan inta badan loo eegaa xaaladaha adag ee ka jira waddanka, sida natiijada kasoo baxday marxalad dagaal dhacay ah.

Ka baaraandegidda codsiga

Muddo yar ka dib marka uu qofka magangelyadoonka ah yimaado Norway waxa loogu yeedhaa wareysi. Wareysigaas iyo codsiga ay la socota caddeynta adiga kaa timi ayaa aasaas u ah qiimeynta in codsaduho heysto sabab lagu siiyo magangelyo. Haddii magangelyo lagu siin waayo, waxey si otomaatik ah dawladda Norway u qiimeysaa bal in lagu siin karo ogolaansho degenaansho sababo ilaalin dartood ama ogolaansho degenaansho sababo bini'aadamnimo dartood. Waa ineyse markaa jiraan sababo adag oo bini'aadamnimo.

Cabashada diidmada codsiga magangelyada

Haddii UDI soo diiddo codsigaaga, waxaad xaq u leedahey inaad cabasho ka qaadato go'aanka. Cabashada waa in la gudbiyo 3 toddobaad gudahood kadib marka uu qareenku helo go'aanka UDI-da.

Cabashada waxa marka hore eegeysa UDI, iyaga oo eegaya bal in wax cusubi ku soo kordheen kiiskaaga. Sida caadiga ah waxaad joogeysaa Norway intey cabashadaadu socoto. Tani ma khuseyso haddii UDI aragto iney iska caddahey in aanad u baahneyn magangelyo.

Haddii UDI arki weydo sababo ey ku bedesho go'aanka diidmadeeda, waxey markaa cabashada u dirayaan guddiga cabashooyinka arrimaha ajinebiga (UNE).

Dhoofid

Haddii dawladda Norway soo diido codsiga magangelyada, sidoo kale aaney jirin sabab lagu siiyo ogolaansho degenaansho sababo ilaalin dartood ama ogolaansho degenaansho sababo bini'aadamnimo dartood, waa inaad waddanka ka tagto.

Waa inaad la xiriirtaa booliska si aad ula sameysato ballan ah sidii aad si ikhtiyaarkaaga ah aad waddanka uga bixi karto. Waxa taa beddelkeeda ah inaad adigu ka codsato Ururka Laaji'iinta Caalamiga ah (IOM) iney ka caawiyaan dhoofkaaga. Ururka IOM wey kula kulmi karaan markaad waddankaaga hooyo timaaddo, waase haddii aad adigu sidaa rabto.

Haddii aad waddanka uga bixi weydo si ikhtiyaarkaaga ah, booliska ayaa kuu dhoofinaya waddankaaga, haddii laga maarmi waayi si khasab ah. Kharashka lagugu dhoofinayo waxa uu noqonayaa mid ey dowlada norweey kugu leedahay.

Habka 48ka-saacadood

Laga bilaabo 1. janawari 2004 waxa la soo saarey hab 48-saacadood ah si loo eego codsiyada magangelyada dadka ka yimi waddamada ey Agaasinka Ajinebigu (UDI) u aragto iney yihiin nabad.

Magangelyadoonayaal aad u tiro yar oo codsigoodu yahay bilaa sabab ayaa Norway laga siiyaa ogolaansho degenaansho. Codsigaaga waxa loo eegayaa si shakhsiyan ah, laakiin ka degdeg badan codsiyada caadiga ah (48 saacadood gudahood) iyada oo la adeegsanayo hab la fududeeyey.

Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan magangelyada eeg www.noas.org halkaas oo aad ka heli doonto warbixin ku qoran luqado kala duwan.

The Norwegian Directorate of Immigration
P.O. Box 8108 Dep.
N-0032 Oslo
Office address: Hausmannsgate 21

Phone: (+47) 23 35 15 00
Fax: (+47) 23 35 15 15
www.udi.no
E-mail: udi@udi.no

Last updated: 13.02.2007

UDI
Norwegian Directorate
of Immigration